# Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore| Oktoobar 2024

## Mawduucyada laga hadlayo inta lagu jiro wicitaanka


Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore| Oktoobar 2024 ........ 1

Ku saabsan Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore ........ 2

Su'aalaha Wicitaanada Xiriiriyaha ........ 2

Adeegyada Waxbarashada Hore ........ 2

Xafiiska DEED Office of Child Care Community Partnerships ........ 2

Department of Labor and Industry ........ 2

Shatisiinta Daryeelka Carruurta - Guud ahaan ........ 3

Shati Siinta Xarunta Daryeelka Carruurta ........ 4

Shati siinta Daryeelka Carruurta ee Qoyska ........ 5

## Ku saabsan Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore

Saddexdii biloodba mar, gobolku wuxuu martigeliyaa Wicitaanada Xiriiriyaha ee adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta carruurnimada hore si ay uga jawaabaan su'aalaha la xiriira sharciga, shatiga, barnaamijyada, deeqaha iyo waxyaabo kale oo badan. Ujeedada wicitaanku waa in laga jawaabo caddeynta su'aalaha laga yaabo in adeeg-bixiyeyaasha ay qabaan. Wicitaanada waxa lagu dhexqabtaa onlayn ahaan barta WebEx, waana la duubaa dadwaynaha ka soo qaybgeli kari waayayna toos. Wicitaanada waa la duubaa waxayna diyaar ku yihiin bogga Xiriiriyaha Carruurnimada Hore. Turjuumadaha su’aalaha laga jawaabay inta lagu jiro wicitaanka ayaa sidoo kale loo heli karaa onlayn ahaan.

Dhammaan macallimiinta noocyada kala duwan waxaa lagu casuumayaa wicitaanadaas. Waxaanu soo dhaweyneynaa su’aalaha ka imanaya barnaamijyada dugsiyada carrruunimada hore, barnaamijyada shatiga leh, xarumaha shahaadada leh, barnaamijyada ka reeban, adeeg bixiyeyaasha sharciga ah ee aan shatiga lahayn, Qoyska, Asxaabta iyo daryeelayaasha Deriska, iyo shakhsiyaadka xiiseynaya inay bilaabaan ganacsiga daryeelka carruurta.

## Su’aalaha Wicitaanada Xiriiriyaha

### Adeegyada Waxbarashada Hore

Waxaan helnay su'aalo kooban oo ku saabsan macallimiinta carruurnimada hore ee barnaamijyada ku saleysan dugsiga iyo xaaladooda qandaraas. Su'aalaha waa in loo gudbiyaa wakiilka ururkaaga maxalliga ah.

### Xafiiska DEED Office of Child Care Community Partnerships

- Ma jiraan barnaamijyo la heli karo si loo caawiyo barnaamijyada daryeelka carruurta ee dhanka miyiga?
    - Jawaabta: Deeqda Horumarinta Dhaqaalaha Daryeelka Carruurta ee RFP ayaa hadda soo baxday. Codsiyada Deeqaha Tartanka loo galo iyo Qandaraasyada /Minnesota Department of Employment and Economic Development (mn.gov) waxaa la rabaa ugu dambeyn 10/31/24 markay tahay 4 galabnimo. Ugu yaraan 50% lacagahaas waa inay tagaan miyiga Minnesota. Iyada oo qayb ka ah RFP ugu yaraan hal abaalmarin oo ah $500,000 ayaa la bixin doonaa si loo siiyo adeeg-bixiyeyaasha yaryar ee gaarka loo leeyahay ee gobolka oo dhan. Sidoo kale waxaa jiri doona $900,000 oo lacag dawladeed ah lana heli karo dabayaaqada dayrtan taas oo keliya tegi karta miyiga Minnesota.

### Department of Labor and Industry

- Waxaa jira isbeddelo dheeraad ah oo ku yimaada shuruucda federaalka ee waqtiga dheeraadka ah. Ma jiraan taageero dowladeed oo lagu dabooli karo kharashaadka dheeraadka ah?
    - Jawaabta: Isbeddelo ayaa ku yimi xeerarka federaalka ee waqtiga shaqo ee dheeraadka ah oo dhaqan galaya Luulyo 1, 2024 iyo Janaayo 1, 2025. Sida ku xusan xeerarka cusub, xaddiga mushaharka ka dhaafista waqtiga dheeraadka ah wuxuu kordhay xaddi u dhigma mushahar sanadle ah oo ah $43,888 1-da Luulyo, 2024 wuuna sii kordhi doonaa oo noqon doonaa $58,656 Janaayo 1, 2025. Tani waxay ka dhigan tahay in shaqaalaha fulinta, maamulka, iyo kuwa xirfadlayaasha ah ee mushaharka leh ay u baahan doonaan inay helaan mushahar ugu yaraan qaddarradan ku habboon si looga dhaafo shuruudaha waqtiga dheeraadka ah ee federaalka. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo bogga websaydkan ee ay leedahay the US Department of Labor ama wac 1-866-487-9243 si aad wax badan u ogaato. Barnaamijka The Great Start Compensation Payment Support Program wuxuu bixiyaa maalgelin dheeraad ah oo loogu talagalay mushaharaadka dadyowga si joogto ah u daryeela carruurta.

## Shatisiinta Daryeelka Carruurta - Guud ahaan

- Qabyoqoraalka ugu horreeya ee casriyeynta xeerka daryeelka carruurta wuxu ahaa mid aad u hawlbadan. Maxaa dhacaya tan iyo markii aan maqalnay in hakad jiro?
    - Jawaabta: Iyada oo ku saleysan jawaabcelinta daneeyayaasha xagaagan, waaxdu waxay go 'aansatay inay kordhiso jadwalka qaybtan ee mashruuca casriyeynta xeerka daryeelka carruurta. Tan iyo dhammaadka xagaaga, kooxda mashruuca waxay falanqeyneysay dhammaan jawaabcelinta laga helay fadhiyada dhageysiga, jawaabaha sahanka, wareysiyada, iyo iimeylada. DHS waxay qorsheyneysaa inay dhowaan bishan la wadaagto soo koobida mowduucyada muhiimka ah ee ka socda fadhiyada dhageysiga iyo sahanka. Kordhintu waxay u oggolaaneysaa DHS waqti ay ku abuurto qoraallo kale oo ka mid ah heerarka shati bixinta ee dib loo eegay ee **daryeelka carruurta ee qoyska iyo xarunta daryeelka carruurta labadaba**, oo aan fileyno in la sii deyn doono Diiseembar. Sannadka soo socda (Janaayo-Juun 2025) waxaan qorsheyneynaa inaan helno wareeg kale oo jawaabcelin ah oo ka timid adeeg-bixiyeyaasha, shati bixiyeyaasha, iyo qoysaska oo ku saabsan qabyoqoraalka soo socda. DHS waxay hadda qabyoqoraalka kama dambaysta ah ku soo gudbin doontaa fadhiga sharci dejinta ee 2026.

- Waa maxay dukumiintiyada looga baahan yahay carruurta aan u dulqaadan karin laaktooska?
    - Jawaabta: Dulqaad la'aanta Laaktooska waxaa lagu xallin doonaa iyada oo loo marayo cunto la qoray. Haddii **xarunta daryeelka carruurta** ay leedahay ilmo diiwaangashan oo leh cunto dhakhtar qoray, xaruntu waa inay ilaalisaa amarka cuntada ilmaha iyo muddada uu ku jiro diiwaanka ilmaha. Dhammaan shaqaalaha loo qoondeeyay inay daryeelaan ilmaha waa in la ogeysiiyaa amarka cuntada. Haddii **Adeeg-bixiyaha Qoyska ee Daryeelka Carruurta** ay leeyihiin ilmo aan u dulqaadan karin laaktooska, waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan Foomka Macluumaadka Xasaasiyadda ee Adeeg-bixiyaha Qoyska ee Daryeelka Carruurta. Foomkan waa in lagu hayaa faylka guriga daryeelka carruurta ee qoyska. Fadlan ogow: Sida waafaqsan MN Statute 245A.51, subd. 1, ka hor intaanad ilmaha gelin daryeelka, shati haystaha waa inuu waalidka ama masuulka sharciga ah ka helaa macluumaad ku saabsan xasaasiyad kasta oo la og yahay. Macluumaadka xasaasiyadda ilmaha waa in lagu qoraa foom ay ansixiyeen komishanka, si fudud loo heli karo dhammaan daryeelayaasha, oo ay dib u eegaan sannad kasta shati hayste iyo daryeel bixiye kasta.

- Waa maxay dukumiintiyada loogu baahan yahay carruurta xasaasiyadda ka qaba penicillin marka aanan goobta ku haysaniin penicillin? Weli miyay u baahan yihiin ICCPP?
    - Jawaabta: Haa, ICCPP (Individual Child Care Program Plan) ayaa loo baahan yahay. Heerarka shati bixinta **xarunta daryeelka carruurta** waxay u baahan yihiin in ka hor diiwaangelinta, shati haystayaasha ay ka helaan dukumiintiyada xasaasiyad kasta oo la og yahay waalidka ama masuulka sharciga ah ama ilaha daryeelka caafimaadka ee ilmaha, inay macluumaadka ka dhigaan mid cusub, oo ay diyaariyaan ICCPP. ICCPP-ga waa in ay ku jiraan inkastoo aanay ku koobnayn sharraxaadda xasaasiyadda, waxyaabah gaarka ah ee kiciya, farsamooyinka la iskaga ilaalinayo, astaamaha falcelinta xasaasiyadda, iyo hababka looga jawaabayo falcelinta xasaasiyadda, oo ay ku jiraan daawooyinka, qiyaasta, iyo macluumaadka iyo sida dhakhtarka loola xiriirayo. Haddii **Adeeg-bixiyaha Qoyska ah ee Daryeelka Carruurta** ay leeyihiin ilmo xasaasiyad ka leh penicillin, waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan Foomka Macluumaadka Xasaasiyadda ee Qoyska Daryeelka Carruurta. Foomkan waa in lagu hayaa faylka guriga daryeelka carruurta ee qoyska. Fadlan ogow: Sida waafaqsan MN Statute 245A.51, subd. 1, ka hor intaanad ilmaha gelin daryeelka, shati haystaha waa inuu waalidka ama masuulka sharciga ah ka helaa macluumaad ku saabsan xasaasiyad kasta oo la og yahay. Macluumaadka xasaasiyadda ilmaha waa in lagu qoraa foom ay ansixiyeen guddidu, si fudud ay u heli karaan dhammaan daryeelayaasha, oo ay dib u eegaan sannad kasta shati hayste iyo daryeel bixiye kasta.

- Waa maxay sababta barnaamijyada daryeelka carruurta ay ugu baahan yihiin macluumaadka dhakhtarka ilkaha ee ilmaha? Ka waran haddii ilmuhu aanu weli arkin dhakhtarka ilkaha?
    - Jawaabta: Xeerka **xarunta daryeelka ilmaha** hadda wuxuu u baahan yahay magaca, cinwaanka, iyo lambarka taleefanka ee cidda daryeelka caadiga ah ee ilkaha iyo daryeelka ilkaha ee degdegga ah siisa ilmaha. Iyada oo qayb ka ah mashruuca heerarka shati bixinta dib loo eegay, waxaa la tixgelin doonaa haddii tani ay tahay inay sii socoto ama aan loo baahnayn heerarka la cusbooneysiiyay. Haddii ilmuhu aanu weli arkin dhakhtarka ilkaha, adeeg-bixiyuhu waa inuu arrinkaas ku muujiyaa faylka ilmaha. **Daryeelka Carruurta ee Qoyska** wuxuu u baahan yahay macluumaad ku saabsan dhakhtarka ilkaha ee ilmaha ee Foomka Ogolaanshaha iyo Diyaarinta Carruurta Qoyska. Hase yeeshe, haddii ilmuhu aanu weli lahayn dhakhtar ilkaha ah, waa in tan lagu calaamadeeyaa foomka.

- Ma jiraa ama ma jiri doonaa habyaal tusaale ah oo loogu talagalay qorshayaasha ka baadhista biyaha macdanta liidhka oo nalaga rabo inaan qorno?
    - Jawaabta: Sannadkii 2023, Sharcidejinta Minnesota wuxuu luqad u gudbiyay sharciga Minnesota Department of Health oo ku waajibinaya xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga iyo shahaadada leh inay abuuraan qorshe oo ay bilaabaan baadhista inay macdanta sunta ah ee liidhka ku jirto biyaha la cabo ugu yaraan hal mar shantii sanaba mar laga bilaabo Luulyo 1, 2024. Hadda ma aha shuruud shati bixinta DHS. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo bogga websaydka ee MDH. Waxaad sidoo kale wixii su'aalo ah kala xidhiidhi kartaa MDH halkan HEALTH.WIIN_Grant@state.mn.us ama 651-201-4700.

- Tababarka Qaadista Carruurta Maadaama tababarka cusub ee BEST loo baahan yahay (rasmi ahaan CARS), ma bixin kartaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan tababarkan iyo goorta la heli doono?
    - Jawaabta: The Department of Public Safety waxay tababarka CARS bixin doontaa illaa 2024. Laga bilaabo 2025, CARS mar dambe lama bixin doono oo waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso shuruudahan tababarka iyada oo loo marayo BEST (Basic Education for Safe Travel ama Waxbarashada Aasaasiga ah ee Safarka Badbaadada ah). Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan tababarka BEST, booqo websaydka Child Passenger Safety ee Minnesota Safety Council oo hoos ugu soco cinwaanka CARS Transitioning to BEST.

- Kulanka SUIDS/AHT ee loogu talagalay tababarayaasha waxaa naloogu sheegay qaybta Warbixinta Waajibka ah in aan mar dambe loo baahnayn inaan ku soo gudbino warbixin qoraal ah 72 saacadood gudahood ka dib warbixinta afka ah. Taas ma sax baa?
    - Jawaabta: Warbixinta waajibka ah ee ku saabsan Xeerka habdhaqanka aan wanaagsanayn ee Carruurta lagula kaco, Xeerarka Minnesota, Cutubka 260E, waxay u baahan tahay warbixin afka ah in si degdeg ah loogu sameeyo taleefanka ama haddii kale marka wargeliyaha loo xilsaaray uu ogaado ama uu haysto sabab uu u rumeysan yahay in ilmaha lagu hayo ama lagu dhibaateeyo 3dii sano ee la soo dhaafay. Degdeg ah macnaheedu waa sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah laakiin aan ka badnayn 24 saacadood. Sharcigu wuxuu u baahan yahay warbixinta afka ah in la raaciyo warbixin qoraal ah 72 saacadood gudahood, marka laga yimaado fasaxyada todobaadka iyo fasaxyada kale. Waxaa jiray qodobo lagu daray 260E oo sheegaya in marka la hirgeliyo Provider Hub iyo horumarinta foomamka warbixinta, warbixin ku soo gudbinta Hub ay buuxin doonto shuruuddan. Waxaan wali ka shaqeyneynaa qaybtan, waxaanan ku wargelin doonnaa adeeg-bixiyeyaasha markay tani diyaar noqoto.

## Shati Siinta Xarunta Daryeelka Carruurta

- Waxaanu u lugaynaa jardiinada taas oo ka dhigan waqti .4 mayl ah oo aan maalin kasta baxno. Waxaanu qaadannaa fooniyaha lagu wadahadlo oo leh masaafo dib loogula xiriiro barnaamijka si loo isticmaalo haddii loo baahdo in farriimo la gudbiyo. Xubin ka mid ah shaqaalaha ayaa soo qaata taleefankooda gacanta ee shakhsi

ahaaneed. Miyaanu u baahanahay taleefanka gacanta oo ku xiriirsan daryeelka ilmaha si loo buuxiyo u hoggaansanaanta?

  - Jawaabta: Heerarka shatiga xarunta daryeelka carruurta ee hadda jira waxay u baahan yihiin taleefan shaqeynaya inuu yaalo xarunta waqti kasta. Tani waxay noqon kartaa taleefanka gacanta laakiin waa in loo qoondeeyaa inuu noqdo taleefan xarumeed oo uu sii yaalo xarunta marka xarunta ay shaqeyneyso. Intaa waxaa dheer, marka carruurta lagu daryeelo meel ka baxsan xarunta, sida safarada loo baxo ama marka xaafadaha la dhex lugaynayo, shaqaaluhu sidoo kale waa inay haystaan taleefan shaqaynaya inta ay ka maqan yihiin xarunta. Taleefanka shaqsiga ah ee qofka shaqaalaha ah ayaa loo isticmaali karaa ujeedadaas.

## Shati siinta Daryeelka Carruurta ee Qoyska

- Maadaama shatiga cusub ee joogtada ah ee Daryeelka Carruurta Qoyska uu bilaabmaya Janaayo 1, 2025, sidee loo tirinayaa saacadaha tababarka? Fadlan sharrax waxa dhici doona haddii shatigooda la cusbooneysiiyo Oktoobar 2024.
  - Jawaabta: Haddii adeeg-bixiyuhu leeyahay booqashadiisa shatiga Oktoobar 2024, shati bixiyaha booqashadaas wuxuu dib u eegi doonaa tababarka laga bilaabo Oktoobar 2023-Oktoobar 2024. Inta lagu jiro booqashada shati bixinta ee 2025, shati bixiyaha ayaa eegi doona tababarka dhammaaday Janaayo 2024-Diiseembar 2024. Si kastaba ha noqotee, haddii adeeg-bixiyuhu aanu dhammeystirin 16 saacadood ee tababarka sanadlaha ah inta lagu jiro sanad-kalanadareedka, amarka sixitaanka lama soo saari doono oo rukhsad-bixiyuhu wuxuu siin doonaa caawimaad farsamo oo ku saabsan shuruudaha in tababarka sanadlaha ah la dhammaystiro inta lagu jiro sanad kalandareedka. Kadib, inta lagu jiro booqashada shatiga ee 2026, shati bixiyaha ayaa dib u eegi doona tababarka la qaatay inta u dhexeysa Janaayo 2025 - Diseembar 2025.

- Waa maxay nooca go’a la rabo in loo adeegsado xoolka carruurta si loo buuxiyo shuruudaha shatibixinta?
  - Jawaabta: Xeerka MN wuxuu u baahan yahay go’ dhuujisan. Gaar ahaan, Xeerka MN Cutubka 245a 1435 wuxuu dhigayaa "(b) Shati haystaha waa inuu ilmaha dhigaa xoolka oo si toos ah u dhigaa furaash adag oo leh go' si adag ugu dhuujisan kuna habboon cabbirka furaashka, taas oo si adag ugu dhuujisan furaashka, oo ka gudubta hoos iyo kor taaso kaso bixi karin iyadoo la jiidayo geeska go'a iyadoo la adeegsanayo xoog macquul ah."